# Zakaatul Fidrigu Ma Waajib Baa ?

Zako la yidhahdo zakaatul fitri baa ku waajibeysa ruux kastaba maalinta ciida iyo habeenkeeda. Zakada waxa loo qeybiyaa laba qeybood 1. زكاة البدن .2 زكاة المال . Zako xoolaha ay ka waajibtaa, zakana dadka ayey ka waajibtaa. Zakada markaa zakaatul baden ee dadka ka waajibta waxa ay noqoneysaa zakaatul fidriga. Waana faral oo culumadu waa ay isku waafaqsan yihiin in uu zakaatul fidrigu waajib uu yahay, khilaaf muctabar ah ku ma sugna. Axaadiista Nebiga ﷺ waa ay ku cadahay.



**عن ابن عمر رضي الله تعالى عنهما قالٍ : فرض رسول الله صلى الله عليه وسلم زكاة الفطر صاعاً من تمر، أو صاعاً من شعير؛ على العبد والحر، والذكر والأنثى، والصغير والكبير من المسلمين. و أمر بها أن تؤدي قبل خروج الناس إلى الصلاة. متفق عليه.**

Rasuulku wuxuu faral yeeley zakadii zakaaatul fidriga ahayd. Markaa sunnah ma aha waa faral. Ruux walba in laga bixiyaa waajib ah, sida xadiiska laftiisu sheegeyo. Nebiga ﷺ waxa uu faral yeeley zakada zakaatul fidriga saac timir ah in la bixiyo, ama saac heed ah in la bixiyo.Wuxuu ku faral yeeley mid kasta oo lab iyo dhedig, mid kasta oo xor ah iyo midkasta addoon ah, midkastoo yar iyo mid kasta oo weyn. Yacni dhamaan dadka waalaga wada bixineyaa. Kii waalnaa waalaga bixineyaa zakaatul fidriga waa waalan yahay mukallaf ma aha la odhan maayo, isaga yaanan wax ku waajibin laakin in laga bixiyaa ayaa waajib ah.

Ilmihii yaraa waalaga bixineyaa waana la isla ogol yahay , naskuna waa sheegeyaa. Markaa ruux kastaba in laga bixiyaa ayaa waajib ah, waxayna ku waajibeysaa masruufeysa oo ruuxu isagu in uu iska bixiyo weeyaan ninku, cidda uu masruufeyana waa in uu ka bixiyo

بحديث ابن عمر - رضي الله عنه - أنَّ رسول الله - صلَّى الله عليه وسلَّم - قال: "أدُّوا زكاة الفِطْر عمَّن تمونون .

Fidriga  ka bixiya cidda aad masruuftaan. Macna ahaan culumadu sidaas qaaliban waa ogol yihiin in ciddii la masruufo laga bixineyo. Markaa ninku wuxu ka bixineyaa ubadkiisi, ooridiisi, iyo ciddii kale ee gurigiisa joogtey uu masruufo yacni waxa ay noqoneysaa dhamaan in uu ka bixiyo.

## Xikmada Loo Bixineyaa  Zakaatul Fidriga Waa Maxay ?

**عن عبدالله بن عباس رضي الله عنهما قال: " فرض رسول الله صلى الله عليه وسلم زكاة الفطر طهرة للصائم من اللغو والرفث، وطعمة للمساكين**

Sida xadiisku uu sheegey waxa loo bixineyaa waa quudin ay masaakinta u tahay, oo masaakiintii la quudineyo oo wax la siineyo si aynan maalintaa u qaajoon oo iyagu u murugoonin oo faraxa muslimiinta u la qeybsadaan. Muslimiinti maalinta ciida waa faraxsan yihiin laakin calooshoodu haday ololeyso wax alle wax ay dajiyaan aaney haysan oo ay qaajo hayso dadkii kalena markaa ay xaragooneyaan , oo ay markaa faraxsan yihiin dee farxadisii muslimiinta ula qeybsadaan waan in markaa qaajada laga biiyaa. Markaa xikmadaa waa ay ku jirtaa waa nooc takaaful ijtimaaci ah. Xikmad labaad waa ay ku jirtaa waxa ay nadiifin iyo daahirin u tahay qofkii soomanaa waxa ay ka nadiifineysaa af xumada iyo hadalka maalacyaniga ah waxa yaalihii ka dex dhacey soonka gudihiisa. Yacni taqsiir ayuu la imaneyaa oo cibaadadii qofku kula imaneyaa waxyaala taqsiirka uu la imaneyo ayey markaa ka nadiifineysaa. Xikam kale waxa ku jira oo xikmooyinka kale ku jira ka mid ah shukri naga lagu shukri naqeyo nicmadii soonku in uu



dhameystirantay. Waa shukri Ilaahay nicmada loogu shukri naqeyaana waa ku jirtaa oo waxyaalaha ku jira ayey ka mid tahay.

## Qadarka la bixineyo waa maxay ?

**عن ابن عمر رضي الله تعالى عنهما قال : فرض رسول الله صلى الله عليه وسلم زكاة الفطر صاعاً من تمر، أو صاعاً من شعير؛ على العبد والحر، والذكر والأنثى، والصغير والكبير من المسلمين. و أمر بها أن تؤدي قبل خروج الناس إلى الصلاة. متفق عليه.**

Qadarka la bixineyo Nebiga ﷺ ayaa sheegey saac ayuu ka cabirey. Saacu waa maxay ? Saacu waa afar mud. Mudka qadarkiisu waa intee ? Mudka qadarkisuu waxa weeye labada baabaco ama labada sacab marka sidaa la isku bar bar dhigo. Nin baabacooyinkiisu dhex dhexaad ay yihiin oo aad aanan u baabaco weyneyn iyo mid ay baabacadiisu ay aad u yartahay aanan ahayn ee xoogaa dhex dhexaad ah in markaa raashin laga buuxiyo. Dabadeedna raashinka ay qaadaan labadaa sacab waxa ay noqoneyaan mudkii. Taqdiirka culumadu ay ku qadaraan waa ay kala duwan tahay oo culumada qaarkodba qadar ayey sheegaan. Qaar yidhahda waa laba kiilo iyo rubuc, qaar yidhahda laba kiilo iyo afartan gram, qaar yidhahda laba kiilo iyo 4 boqol oo gram, qaar ka sii badiya, qaar gaadhsiiya saddex kiilo in la bixiyaa ayaa fiican oo sida Sheekh Ibn baaz uu marey. Calaa kulli xaal hadduu ruuxu laba kiilo iyo badh bixiyo ama laba kiilo iyo afar boqol oo gram waa kifaaya. Laba kiilo iyo afar boqol oo gram hadduu bixiyo waa ay u dhan tahay oo zakaatul fidrigii waa bixiyey. Laba kiilo iyo badh hadduu bixiyana waa ka sii badiyey. Qadarka la bixineyaa waa intaas.



## Goorma ayey waajibtaa zakaatul fidrigu ?

Goorta ay waajibto culumadu waxa ay yidhahdeen waxa ay waajibtaa qoraxdu marka ay dhacdo habeenka ciida. Ahlul cilmiga qaarkood waxa ay yidhahdeen maya waxa ay waajibtaa salaadda subax waaga dilaaciisa ayey ku waajibtaa ,fajru saadiqa dilaaciisa ayey ku waajibtaa oo maalinta ayey la kowsaneysaa waayo wakhtiga afuraadu ku dhaceyso waa maalinta awalba habeenkii waala cuneyey. Waxa soo kordhey waa maxay ? Waa in maalintii la afuro oo wax la cuno wakhtigaa soo kordhey in wax la cunaa uu bilaab maneysaa ee soo kordhey goorma ayey bilaabmaneysaa ? fajru saadiqa ayey bilaabmaneysaa ayey yidhahdeen oo fajru saaqida ayey waajibeysaa. Oo maxaa u dhaxeeya labada qawl ? Waxa u dhaxeeya ilmiii markaa jirey ama dhashay markii uu maghribku soo geleyey maalinta ciida maghribkeedi daqiiqad ka hor ayuu dhashay, dabadeed qoraxdu waxa ay dhacdey isaga oo jira, saqdii dexe ayuu go'ay , waaga dilaaciisa ma gaadhin zakatul fitri in laga bixiyaa ma ka waajibeysaa mise ka waajibimeyso ? Haddii lagu socdo aakhirka ramadaan in qoraxdu dhacdey ayey ku waajibtaa haddii lagu socdo, dee aakhirkaa waa joogey oo qorax dhacii waa noola, laakin waagi ma soo gaadhin, markaa waxa ay noqoneysaa waa ku waajibtey ayey noqoneysaa. Qorax dhaca ayey ku waajibtaa haddii la yidhahdo, waxa ay noqoneysa waajib in laga bixiyo. Haddii laakin la yidhahdo fajru saadiqa waaga dilaaciisa ayey ku waajibtaa, waaga dilaaciisa ma nooleyn, maadaama aanu nooleyn zakaatul fidri ka waajibi maayo. Samarada khilaafku taas ayey noqoneysaa labada qawl u dhexeeya. Markaa qawlka odhanaaya waxa ay ku waajibeysaa qorax dhaca waa sixa ixtiyaadka waafaqsan waana sida culumada qaarkood ay doorteen waxa ayna yidhahdeen maalinta ciidu waxa ay ka bilaab maneysaa qorax dhacii bay ku soo bilaab maneysaa afuuradu wakhtigan haku gaar noqoto, laakin habeenkii iska maalinta ayey iska xisaabsan tahay , laylatul ciidna waa ay iska guda jirtaa markaa sidaas aawadeed halaga bixiyo.

## Ilmaha uurka ku jira ma ka waajibeysaa in laga bixiyo zakaatul fitri mise ka waajibi meyso?

Ooridu uur bey leedahay ilmihii wali ma dhalan, waxa markaa ciidi soo gashay iyada oo ilmuhu uurka ku jiro. Saxdu waxa ay tahay in aynan ku waajibeynin laakin saxaabadii Nebiga ﷺ bacdi ka mida waxa laga soo weriyey in ay ka bixin jireen. Waxa ay ku xanbaaraan culumadu sunnanimo in ay tahay oo taasi sadaqo iska noqoneyso laga bixiyey laakin saxaabada qaarkood waaka soo aroortey.

## Lacag malugu bixin karaa zakaatul fidriga mise laguma bixin karo ?

Culumadu waa ay isku khilaafeen oo khilaaf baa ku jira. Qolyaha xanafiyada la yidhahdo waxa ay yidhahdeen lacag waa lagu bixin karaa wax dhibi ah ku ma sugna. Jamaahirta culamada sida saddexda madhab ee kale ay ka mid yihiin waxa ay yidhahdeen ”maya lacag laguma bixin karo waa in cunto lagu bixiyaa.”

**وعن أبي سعيد الخدري رضي الله عنه قال: كنا نعطيها في زمن النبي -صلى الله عليه وسلم- صاعاً من طعام، أو صاعاً من تمر، أو صاعاً من شعير أو صاعاً من زبيب"**

Waxa ay u sababeeyen Nebigu ﷺ wuxuu yidhi saac dacaam ah saac timir ah ama saac heed ah ama saac zabiib ah. Yacni dacaam ayuu sheegey Nebigu ﷺ. Lacag muu sheegin. Taqdiiraadkii uu sheegey ku ma darin ama lacag goysa muu odhan. Lacagina markaa waa ay jirtey waalana isticmaali jirey waxa uu Nebigu ﷺ lacagtii uga leexdey cuntada u sheegey xikmad gaar ah ayaa ku jirta. Xikamka ku dhex jira waxa ka mid ah shicaar islaami ah

weeyaan oo shicaarkii ayaa muuqaneya. Haddii mid walIba raashiinkii wado oo raashinkii la dhiibeyo, masaakintii raashinka ay wadato oo ay sidato iyo haddii lacag yar loo dhiibo jeebka ay gashadaan oo in wax la siiyey iyo in kale lakala arkeynin. Dee labadu waa kala duwan tahay shicaarkii ayaa muuqaneyo yacni shicaar islaami ah ayaa ku jira. Markaa asalku wuxu yahay dacaamka, dacaamkaas ayuu nasku ku soo aroorey. Markaa waa in cuntadaa lagu bixiyaa.

Khilaaf baa ku jira lacagta ma ku ansaxeysaa mise ku ansixi meyso oo lacag haddii lagu bixiyaa ma gudeysaa mise gudi meyso. Culumo badan waxa ay leeyihin gudi meyso lacagtu. Ta kale waxa cadeyneya in cuntanimadu in ay maqsuud tahay oo iyada loo jeedo ashyaa ayuu Nebigu ﷺ sheegey oo kala duwan oo saac timir ah iyo saac zabiib ah, saac caqid ah iyo saac shaciir ah. Qiimohoodu waa ay kala duwan yihiin isku qiimo ma aha, markaa qiimuhu in aanu maqsuud ahayn ee saacnimada loo jeedo cunta in ay tahay ayaa markaa laga qaadaneyaa. Markaa asalku waxay ay tahay in cuntada lagu bixiyo. Bacdul ahlul cilmi waa ay yara dhex dhexaad sadeen oo waxa ay yidhahdeen haddi ka fursan waa u jiro oo laga maarmi waayo lacag in la siiyo miskiinku uu ku dhibaatooneyo haddii raashinka la siiyo ama meel uu ku karsado aanu haysan xaalada caynkaasi ah ka fursan waa isaga halugu rukhseeyo. Laakin haddii kale waa in lugu bixiyaa cuntada oo aan lacag lagu bixin. Qawlkaas waxa marey Sheikh Ibn Taymiyyah iyo culumo kale.

## Zakada la bixineyo goorta la bixineyo ?

Zakada la bixineyo salaada ka horeyso wakhtu fadiilaheedu. Maalinta oo dhan waala bixin karaa, kadibna waa la bixin karaa sida ay jamaahirtu culumadu ay ku tageen waayo Nebigu ﷺ wuxu amray أمر بها أن تؤدي قبل خروج الناس إلى الصلاة salaada ka hor in la guto. Wuxuu kale Nebigu ﷺ uu yidhi

**من أداها قبل الصلاة فهي زكاة مقبول، ومن أدها بعد الصلاة في صدقة من الصدقات أخرجه أبو داود وابن ماجه بسند حسن.**

Salaadda ciida ka hor kii quta oo zakadaa bixiya waa zako la aqbaley. Salaada ciida dabadeed kii guta waa sadaqo sadaqooyinka ka mid ah. Yacni faralkii waa ka dhaceyaa laakin sawaabka badan ku ma heleyo ayaa looga jeedaa sida ay jaamihur ahlul cilmi ka istinbaaden oo kale bexeen. Sidaas aawadeed amarka xadiisku sheegaayo wujuubnimo in laga sarfineyo ayaa laga qaadaneya maadaama la yidhi من أداها قبل الصلاة فهي زكاة مقبولة oo wax dembi ah iyo in wax saaran yihiin markaa aan lagu sheegin iyo in uu dambaabey iyo in uu ka tawbad keeno midnaba aan la sheegin. Hadduu sheygu dambi ahaan lahaa waxa la odhan lahaa markaa haka tawbad keeno oo dunuubta qaarkod tawbad ayaa ka waajibta , qaarna kafaarah ayaa ka waajibta, markaa midnaba maadama aan la sheegin sidaa lagaga aamusey waa qariino ku tusineysa ama amaarad amarka in waajibnimada laga leexinaayo oo sunnanimo loo leexinaayo ku tusineysa.

## Zakaatul fidriga ma la hor marin karaa ?

Zakaatul fidriga xiligeedi garaney maalinta ciida in ay tahay. Habeenkeedi waa la bixin karaa, subaxnimadase in la bixiyo salaada subax dabadeeda illaa inta aan salaada ciida la galin labada dexdooda in la bixiyo ayaa afdal ah.

قد افلح من تزكى وذكر اسم ربه فصلى Culumada qaarkood waxa ay u daliishadeen aayadan in zakadii in la sheegey oo dabadeed salaadii la dambeysiiyey. Culumada qaar waxa ay ku fasireen in zakaatul fitri ay soo geleysaa. Culumada qaarkoodna tawxiid ayey ku fasireen oo waxa ay yidhahdeen waa zakaatul qalbi oo shirkigii laga dahiro oo laga nadiifiyo. Markaa qawlka hore marka lagu

socdo waxa ay noqoneysaa zakadii in la hor mariyey salaadina la dambeysiiyey.

Hor marin ma la sameyn karaa ramadaan gudaheeda la sii bixiyo ?

Taa madaahibtu aad ayey isku khilaafeen oo culamada qaarkood waxa ay yidhadeen ramadaan oo dhan waa la qadimi karaa oo ramadaan soo gasho oo awalka ramadaan ayaa la bixin karaa. Qaar waxa ay yidhahdeen dhexdeeda ayaa la bixin karaa. Laakin qawlka ugu saxani waxa uu yahay maalin ama laba waala hor marin karaa xadiiska Ibn Cumar ayaa ku soo aroorey oo camalka Ibn Cumar waa sheegeyaa saxaabada Nebiguna ﷺ in wakhtigii Nebiga ay sameyn jireen maalin ama laba maalmood in ay hor marin jireen baa ku soo aroortey xadiiska Bukhaari. Markaa taqdiimka qawiga ahi waa in aanan la hor marin maalin ama laba maalmood wax ka badan waa in aan la hor marin. Qawl kale waa jiraa laakin waalaga qawi san yahay.

Masalada ku saabsan naqliga la naqlineyo oo meel kale loo raraayo ta noocasi ah culumadu qaarkood waa ay diidaan laakin waxa weeyi ruuxii markaa tuulooyinka u direya ama geyneya naqliga qaar culumada waa ay cidhiidhiyaan oo waxa ay yidhahdaan wax masaafatul qasri wax ka badan lama naqlin karo. Laakin sida saxiixa ah naqliga zakada la naqlineyaa dhibi aaney ku sugneyn. Dadka yurub iyo maraykan jooga ee dad fuqaro ay siiyaan aan haleynin dadka noocasi oo kale khilaaf yagu ma laha oo khilaafkaasi geli maayo, zakadii ma la naqlin karaa oo meel kale ma loo rari karaa mise loolama rari karo khilaafkaasi ma geleyo waxa ay noqoneysaa markaa in la ogol yahay cid fuqara leh oo zakadiii qaadaneysa oo loo raraa oo loo gudbiyaa in ay markaas banaan tahay.

Shaykh Cabdulkariim  Xasan Xoosh

Axkaamta Zakaatul Fidrida أحكام زكاةالفطر

Masjidu Sunnah , Burco

28 Ramadan 1438, 23 June 2017

www.Manhajonline.com